**OGAYSIIS KU SAABSAN HESHIIS LASOO JEEDIYAY EE QUSEEYA ISTICMAALKA TALEEFONKA EE XABSIGA SOCDAALKA**

**LYON, IWM V. XARUNTA SOCDAALKA IYO FULINTA CANSHUURBIXINTA MAREYKANKA IWM.,**
**KIIS LAM. 3:13-cv-05878-EMC**
**MAXKAMADA DEGMADA MARAYKANKA**
**LOOGU TALOGALAY DEGMADA WAQOOYI CALIFORNIA**

KU: Dhamaan muhaajiriinta dadka waaweyn ah ee xiran waqti xaadirkan iyo mustaqbalka ayna hayso Xarunta Socdaalka iyo Canshuurbixinta kutaala Gobolka Contra Costa, Gobolka Kern, Gobolka Sacramento, ama Gobolka Yuba.

## Ujeedada Ogaysiiskan

Ogaysiiskan wuxuu leeyahay saddex ujeedo: 1) in laguu sheego heshiiska lasoo jeediyay iyo dhageysiga dacwad cadaalada ku saleeysan ee tallaabo dacwad wadareed; 2) in laguu sheego sida aad macluumaad dheeri ah ku heli laheyd, marka lagu darro nuqul dhameystiran ee heshiiska lasoo jeediyay; iyo 3) in laguu sharaxo sida aad u diidi laheyd, heshiiska lasoo jeediyay hadaad ku raacsaneyn.

## Asalka Dacwada

Talaabadan dacwad wadareedka ah waxay caddeynaysaa in Xarunta Socdaalka iyo Fulinta Canshuurbixinta Maraykanka (ICE) aysan siinin dadka muhaajiriinta lagu hayo Xarunta Waqooyiga Contra Costa, Xabsiga Gobolka Yuba, Xarunta Dhaqancelinta Rio Cosumnes (RCCC), iyo Xarunta maxaabiista Mesa Verde (guud ahaan, xarumaha). Gaar ahaan, dacwada waxay caddeynaysaa in Xarunta Socdaalka iyo Fulinta Canshuurbixinta ay jabinayso sharci qoran iyo xuquuqda dastuuriga ah ee muhaajiriinta xiran waayo xaaladaha lagu isticmaalo taleefoonada xarumaha waxay: (1) kahor istaagayaan maxaabiista inay xajistaan ayna xidhiidh wax ku ool ah la sameeyaan qareenada, iyo (2) ka hor istaagayaan maxaabiista inay uruuriyaan caddaymo ay hor geeyaan dacwadaha la xiriiro socdaalka. Sharcigani wuxuu doonayaa in baddel lagu sameeyo Xarunta Socdaalka iyo Fulinta Canshuurbixinta iyo siyaasada xarunta; kuma waydiinayo wax lacag magdhow ah.

Talobixiyaal Wadareed (wakil ka ah danaha maxaabiista xarumaha ku jira) iyo qareenada Xarunta Socdaalka iyo Fulinta Canshuurbixinta ayaa ka gorgortamay heshiis. Maxkamada ayaa bixisay ogolaansho hordhac ah ee heshiiska, talaabada xigtana waa in Maxkamada ay tixgalisaa wixi oraah ama diidmo ay sameeyeen xubnaha wadareed. Waxaa la jadwaleeyay dhageeysiga dacwada Noofambar 17, 2016, saacada 1:30pm .m.uuna qaadayo Mudane Edward M. Chen kasocda Maxkamada Gobolka ee Mareykanka loogu talogalay Degmada California gudaha Qolka Maxkamada 5 – Dabaqa 17-aad ee Aqalka Maxkamada San Francisco, 450 Wadada Golden Gate., San Francisco, California. Dhageysiga dacwadan, Maxkamada waxay tixgalin in heshiiska lasoo jeediyay yahay mid cadaalad ah, macquul ah iyo mid dheelitiran. Kadib Maxkamada waxay ansixin doontaa heshiiska ama fari doontaa inay sii wadaan dacwada.

## Sharaxaada Heshiiska la soo Jeediyay

Qeybta hoose ayaa ah qoraal kooban ee tilmaamaha muhiimka kujira heshiiska. Si aad u hesho nuqul, eeg qeybta ciwaankeedu yahay "Wixii Macluumaad Dheeri ah" ka gadaal qoraalka kooban.

1. Waxaa jiri doona qaabab tiro badan oo lagu sameeyo wicitaan sharci ah taleefoonada goobta xarunta iyo waabab taleefoon oo cusub loogu talogalay wicitaanka gaar ahaaneed gudaha xarunta.

    a. **ICE ayaa soo kordhinayso gujin-xawaareed si loo sameeyo wicitaan lacag la'aan, toos, aanan la dhageysaneyn xafiisyada dowlada oo badan iyo qaar loogu talogalay qareenada gudaha xarunta.** ICE ayaa habbeyn doonta nambaro gujin-xawaareed (la mid ah madasha loogu talogalay mujtamaca ee ICE) taasoo kugu xariirinaysa adigoo u baahneyn qof nool inuu kuu jawaabo uuna qabto wicitaanka aan lagu dhageysaneyn ama lagula soconeyn, ahna bilaash wacaha iyo qabtahaba. Nambaradani waxaa kujiri doona Waaxaha booliiska, Maxkamadaha gobolka iyo federaalka, iyo xarumaha dhaqancelinta iyo sidoo kale qareenada kuwaas oo bixiya matalaad bilaash ah iyo mid lacag bixin u baahan ee socdaalka ayna codsadeen in lagu daro madasha.

    b. **ICE ayaa abuuri doonta liiska qareenada la wici karo adigoo u baahneyn qof nool inuu kuu jawaabo.** ICE ayaa ogolaan doonta in qareenada ( ay kamid yihiin kuwa bixiya qarashka matalaada) inay ka helaan wicitaan taleefoonada xarunta iyagoon u baahneyn inuu qof nool uga jawaabo taleefoonka. Wicitaanadan lama duubayo ama lalama soconayo.

    c. **ICE waxay rakibi doontaa waabab taleefoon gudaha iyo agagaarka xarunta wicitaanada taleefoonada la xiriira kiisaaska.** ICE waxay ogolaatay inay rakibto tiro dhan 40 waab taleefooneed kuwaasoo loo qeybin doono afarta xarumood. Waababka taleefonada waxay u shaqeyn doonaan sida kuwa xarunta, balse waxay lahaan doonaan qarsoodi.

    d. **ICE ayaa xaqiijin doonta isticmaalka waabyada taleefoonada.** Marka laga reebo xilliga tirinta iyo xirista, maxaabiista waxay awoodi doonaan inay waabyada taleefoonada isticmaalaan xilliga lasoo kaco (marka lagu daro xilliga aan bilaashka aheyn ee Contra Costa). Maxaabiista deggan goobaha u baahan in shaqaalo ay u raacaan waabka taleefoonka, sida karantiilka , waxay isticmaali karaan kadib muddo dhan labo saac waqtiyada shaqada marka ay gudbistaan codsi, maqnaanshiyaha xaalado aan caadi ahey (kuwaasoo qasab ah in loo sheego ICE). Maxaabiista kujirta edbin karantiil kuwaasoo edbintooda ay kamid tahay ka xadidida isticmaalka taleefoonada, shuruudahan waxay quseeyaan kaliya xaaladaha degdega ah ee shaqsiyadeed ama qoys, wicitaanada sharciyadeed, ama wicitaanada ay cudurdaar u tahay baahi jirta.

    e. **ICE waxay dheereyn doontaa jarida otomaatiga ah ee wicitaanka taleefoonada.**

        i. *Yuba:* Jarida taleefoonada xarunta waxaa laga kordhinayaa 20 daqiiqo ilaa 40 daqiiqo, mana jiri doonta jarirada otomaatikada taleefoonada qololka Yuba.

        ii. *RCCC:* Jarida taleefoonada xarunta waxaa laga kordhinayaa 20 daqiiqo ilaa 40 daqiiqo.

        iii. *Xarumaha oo idil:* Jarida otomaatikada ee ka wicitaanka madasha bilaashka ee ICE waxaa laga dhigayaa 60 daqiiqo.

        iv. Iyadoo lagu saleynayo rabitaanka lasoo bandhigay ee xaaladaha shaqsiyadeed, ICE waxay soo rogi kartaa xadidaad waqtiga wicitaanka taleefoonada si loo xaqiijiyo inuu qof walba isticmaalo.

2. **Waxaa jiri doona qaabab tiro badan oo loo sameeyo wicitaanka sharciyeed qololka taleefoonada qaaska ah.**

   a. **Maxaabiista socdaalka waxaa loo ogolaan doona in ay u isticmaalan qololka taleefoonada qaaska ah wicitaanka sharciyadeed marka lagu daro wicitaanada dadka aan qareenada aheyn.**

      i. *Guud ahaan:* Wicitaanadan lama keydinayo ama lalama soconayo, mana u ubaahna qof nool inuu kuu jawaabo. Marka wicitaanka aad sameeynayso, shaqaalaha xarunta ama shaqaalaha ICE waxay eegi karaan magaca qofka aad waceyso waxayna waydiinayaan inuu ogolyahay inaad la hadasho, balse kuma dhawaaqi karo in maxbuus kaZoo wacayo xabsiga ama xarun maxbuus. Haduu qofna ka jawaabin, wacaha wuxuu awoodaa inuu fariin cod u dhaafo uuna dhaqaajiyo nidaam jawaabeed otomaatik ah kaasoo u baahan garaacida khad taleefoon.

      ii. *Wicitaanka qareenada:* Maxaabiista socdaalka waxay awoodi doonaan inay ka wacaan qareenada taleefoonadan xilli dheer ama qarsoodi leh. Sidoo kale, qareenada waxay codsan karaan in loo jadwaleeyo wicitaanada waqtiyo gooni ah.

      iii. *Wicitaanka dadka aan aheyn qareenada:* Maxaabiista socdaalka waxay awoodi doonaan inay ka wacaan dadka aan qareenada aheyn taleefoonadan hadii wicitaanka uu quseeyo (tusaale ahaan, codsiga warqad taageero ama inaad hesho caawimaad helitaanka dokumeentiyo) ama in uu maxbuuska kal hore kala xiriiri waayay taleefoonada xarunta.

      iv. *RCCC iyo Yuba:* AQol taleefoon, Waab taleefoon, ama waabab kale ayaa lagu kordhinayaa si loo gaaro shuruudaha gudaha RCCC, taaso waqti xaadirkan laheyn qol taleefoon qarsoodi ah. Waxaa sare loo qaadayaa qolka taleefoonada Yuba.

   b. **Wicitaanada taleefoonada qolka waxaa lagu soo koobayaa kaliya 30 daqiiqo balse maxaabiista socdaalka waxay codsan karaan wicitaan dheer.** Si kasta ay ahaataba, xilliyada dalabka uu sareeyo, ICE waxay xadidii kartaa dherirka wicitaanka si loo xaqiijiyo qof walba inuu isticmaalo.

3. **Fududeeyaha ku sugan xarun kasta ayaa habbeynaya codsiyada taleefoonada wuxuuna bixinayaa isticmaal waqtiyaysan qololka taleefoonada.** Waxaa wicitaanada caadiyan la ogolyahay inta u dhaxeeyso 8 saac ee xilliga shaqada, iyo (marki laga reebo xilliga daruufaha adag ay jiraan) marwalba inta u dhaxeyso waqtiga codsiga oo ah 24 saac.

4. **Xarun kasta waxay qaadaysaa ayna gudbinaysaa wicitaanka aan qarsoodiga aheyn / ama fariimaha emailada la xiriira kiisaska maxaabiista socdaalka muddo dhan 24 saac gudaheeda.**

5. **FMaxaabiista aan awoodin inay bixiyaan wicitaanka taleefoonada, ICE ayaa u diyaarinaysa qol taleefoon oo dheeraad ah ay isticmaalan ama kaar taleefoon.** Tani loo heli karaa maxaabiista haysata in ka yar $15 akoonkooda xabsiga muddo 10 maalin is xigxigta ah xilliga codsiga.

6. **ICE ayaa diyaarinaysa hoyga wicitaanka sharciyadeed ee caalamiga ah iyo wicitaanka seddax geesoodka ee sharciyeed.** Waxaa jiri doona hab lagu codsado wicitaanka sharciyadeed ee caalamiga ah xitaa hadii wicitaanka caalamiga ah aan laga sameyn karin taleefoonada xarunta ama taleefoonada qololka. Marka la codado lana sameeyo bayaan baahiyeed, sida baahida turjubaan inuu wicitaanka kamid noqdo, ICE waxay fududeeynaysaa wicitaanka seddax geesoodka ah xarunta gudaheeda (haday macquul tahay) ama xafiiska ugu dhow.

.

7. **ICE waxay caawin doontaa dadka aan akhrin karin luuqada Ingiriiska ama Isbaanishka.** ICE waxay kusoo dhajin doontaa ogaysiis 10 luuqadood oo acaadi ah kuwaasoo loogu sheegayo maxaabiista inay waydiistaan shaqaalaha xarunta fasiraada isticmaalka qalabka taleefonada iyo caawimaad istacmaalka taleefonada.. Iyadoo la codsaday, hadii aysan turjubaanida maxaliga ah ku filneyn ama la waayo, ICE ayaa isticmaali doonta turjubaan taleefoonka-kusaleeysan inuu bixiyo fasiraad dheeri ah. Waxaa intaa dheer, hadii maxbuuska uu doonayo inuu waco qof aan ku hadlin luuqada Ingiriiska aana fahmi karin dardar gelinta otomaatiga ah ee qabashada wicitaanka, maxbuuska wuxuu isticmaali karaa Qolka Taleefoonka si uu u waco qofka wicitaanada quseeya kiis.

8. **ICE waxay u baahn doontaa tawabarida dhamaan saraakiisha maxaliga ah ee ICE kuwaasoo howshoodu quseeyso xirida iyo shaqaalaha shaqadoodu kamid tahay kormeerida maxaabiista ama bixinta isticmaalka taleefoonada.** ICE waxay faahfaahin ku dari doontaa foomamka kormeerka ay ku isticmaasho xarunta maxaabiista guud ahaan dalka oo idil si ay u qiimayso raacida xeerarka xabisida taasoo quseysa qarsoodida wicitaanada sharciyadeed, degdegsiiyada ka jawaabida codsiyada wicitaan, helitaanka nidaamyada fariin gaarsiineed, helitaanka adeeg fasiraad iyo turjubaanid iyo helitaanka adeeg taleefoon maxaabiista karantiilka kujirta.

9. **Heshiis Shan Sanno ah.** ICE waxay heysataa muddo hal sanno ah kadib markay maxkamadda ansixiso heshiiska si ay u sameeyso isbeddelka loo baahanyahay. Heshiiska wuxuu dhaqan galayaa afarta sanno ee xigta. Xilligaas, ICE waa inay macluumaad siisaa Talobixiyaasha Wadareed si ay u kormeeraan una dhaqan geliyaan sharcigan, marka lagu daro bixinta dokumeentiyo kala duwan iyo ogolaanshaha Talobixiyaasha Wadareed inay booqdaan xarumaha si ay wareeysi ula yeeshaan maxaabiista.

10. **Maxkamada waxay dhaqangelin kartaa heshiiska haday jiraan wax ku xadgudub ah.** Maxkamadda waxay awood u leedahay inay dhaqangeliso heshiiska kiiska.

11. **Ujrada iyo kharashka qareenka.** Dowlada ayaa siinaysa $405,000 Talobixiyaasha Wadareed sheegasjada dhamaan ujrada iyo kharashaadka. Eeg hoos sida aad macluumaad dheeri ah u heli karto kuna saabsan bixinta ujrada qareenka.

12. **Daayida Shhegashooyin.** CXubnaha Wadareed waxay ka deyn doonaan dowlada dhamaan sheegashooyinka iyagoo ku dhawaaqaya ama joojinaya kuwaas oo la keenay iyadoo la matalayo Xubnaha Wadareed kuna saleeysan xaqiiqda xaaladaha eedaha kujira dacwada.

**Wixii Macluumaad Dheeri ah**:

KANI WAA QORAAL KOOBAN EE HESHIISKA, SI AAD U FAHANTO, WAA INAAD AKHRISAA DHAMAAN HESHIISKA. Waxaad heli kartaa nuqulo heshiiska ugu dambeeyay, Mooshinka Talobixiyayaasha Wadareed ay Maxkamada kaga doonayaan ansixinta bixinta ujrada qareenada ee heshiiska, iyo nuqulada Ogaysiiska kayimid 1) Wakiilada Booqasho ee ICE; 2) Shabakada ICE (**www.ice.gov**); 3) Shabakada Waqooyiga California ee ACLU (**www.aclunc.org/our-work/legal-docket/lyon-v-ice-telephone-access-immigration-detainees**); 4) Adigoo wacayo Talobixiyaasha Wadareed isticmaalayana nambarka gujinta-degdega **#9160** una maraysomadasha bilaashka ee ICE ama adigoo waceyso (415) 621-2493, kor. 329; 5)

Qoraalka elektrooniga kooban ee kiiska (Kiis Lam. 13-cv-05878 EMC), laga heli karo https://ecf.cand.uscourts.gov; or 6) adigoo u qoreyso fariin Talobixiyaasha Wadareed ciwaanka hoos ku xusan:

Talobixiyaasha Wadareed
*Lyon v. ICE* Heshiis Talobixiyaasha Wadareed
c/o Ururka Waqooyiga California ee ACLU
39 Wadada
San Francisco, CA 94111

Hadii aad wacayso ama fariin u qorayso Talobixiyayaasha Wadareed, fadlan ku muuji fariintaada ama warqadaada waxa aad waydiinayso (Nuqul heshiiska ah, mooshinka ujrada qareenka, ama Ogaysiiska), magacaaga, iyo sida laguula soo xiriiri karo. Hadii aad xabsi kujirto, sheeg xarunta aad ku xirantahay. Hadii aad xabsi kujirin, fadlan bixi ciwaankaga ama nambarka taleefoonkaga.

FADLAN HA WICIN MAXKAMADA AMA KARAANIYADA MAXKAMADA SI AAD U WEEYDIISO HESHIISKA.

**Nidaamka loo Diido Heshiiska lasoo Jeediyay:**

Waxaad weeydiisan kartaa Maxkamadda inay diido ansixinta heshiiska adigoo buuxinayo diidmo. Ma waydiisan kartid Maxkamada inay amarto heshiis cusub, Maxkamada kaliya way diidi kartaa ama oggolaan kartaa heshiiska. Hadii maxkamada ay diido ansixinta, lama dhaqangelinayo heshiiska waxaana soconayo dacwada. Hadaad rabto taas inay dhacdo, waa inaad diidaa.

Hadii aad diidayso heshiiska lasoo jeediyay, waa inaad qoraal ahaan u diidaa aadna usoo gudbisaa qoraalka diidmada ah Maxkamada. Waxaad ka codsan kartaa wakiilada ICE nuqulo dheeraad ah ee foomkan kuwaas oo booqan doona xarunta maxaabiista. Hadii aad faylgareeyso diidmo, waxaad dooran kartaa inaad kaZoo muuqato Dhagaysiga Ansixinta ugu Dambeyso, shaqsi ahaan ama adigoo u maraya qareenkaaga. Hadii aad kaZoo muuqatid adigoo qareenkaaga usoo maraya, waxaad masuul ka tahay inaad lacag siisaa qareenka hadii loo baahdo.

Dhamaan qoraalada diidmada iyo warqadaha ku taageeraya waa inaad:

(a) si cad ugu qeexdaa nambarka kiiska iyo nambarka Clearly identify the case name and number (*Lyon v. ICE*, Kiis Lam. 13-cv-05878 EMC);
(b) bixisaa: (i) Magaca Xubinta Wadareed iyo xarunta xabsiga xilliga la joogo ama ciwaanka, (ii) Ku dhawwaqid saxiixan in Xubinta Wadareed uu kamid yahay Wadarta, (iii) asbaabaha gaarka ee diidmada, (iv) dhamaan dokumentiyada ama qoraalada uu doonayo Xubinta Wadareed inay Maxkamada tixgaliso, iyo (v) haddii Xubinta Wadareed uu doonayo inuu kasoo dhex muuqdo dhagaysiga Dacwada Cadaaladeed
(c) Maxkamada adigoo email ahaan ugu diraya Karaaniyada Amarada Wadareed, Maxkamada Degmada Mareykanka loogu talogalay Degmada Waqooyiga ee California, 450 Wadada Golden Gate, San Francisco, CA 94102, ama adigoo shaqsiyan uga buuxinaya goob walba ee Maxkamada Degmada Mareykanka loogu talogalay Degmada Waqooyiga ee California
**(d) Wakhtiga ay dhammaanayso diidmooyinka waa la kordhiyay laga bilaabo Sebtambar 8, ilaa Oktoobar 27, 2016. Diidmooyinka waa in la soo xereeyaa oo ay lahaa tigidhkii boosta taariikhda ama ka hor Oktoobar 27, 2016.**

**MAXKAMADA DEGMADA MAREYKANKA**
**DEGMADA WAQOOYIGA CALIFORNIA**

| | | |
|---|---|---|
| AUDLEY BARRINGTON LYON, JR., IWM., | ) | Kiis Lam. 3:13-cv-05878-EMC |
| *Dacwo Bilaabayaasha*, | ) | |
| v. | ) | |
| | ) | **DIIDMADA HESHIISKA LASOO JEEDIYAY** |
| UXARUNTA SOCDAALKA IYO FULINTA CANSHUURBIXINTA MAREYKANKA, IWM., | ) | |
| | ) | Mud. Edward. M. Chen |
| *Eedeysanayaasha.* | ) | |

Kusocoto Maxkamada Sharafta leh:

Waxaan aaminsanahay inaan ahay Xubin Wadareed waayo waqti xaadirkan waxaan u xiranahay ICE (saxhal):

__ Xarunta Maxaabiista Gobolka Galbeed ee ku taal Gobolka Contra Costa

__ Xabsiga Gobolka Yuba ee ku yaal Gobolka Yuba

__ Xarunta Dhaqancelinta Rio Cosumnes ee ku taal Gobolka Sacramento

__ Xarunta Maxaabiista Mesa Verde ee ku taal Gobolka Kern County

Waan kasoo horjeedaa heshiiska lasoo jeediyay: ____________________________________

______________________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________________

__________________________________________ [Ku lifaaq xaashiyaha dheeraadka hadii loo baahdo]

Waxaan doonayaa inaan kasoo hor muuqdo Maxkamada Dhagaysiga Dacwada Cadaaladeed
Haa☐ Maya☐

Saxiixayga ayaa xaqiijinaya dhamaan waxa aan kor ku xusay inay run yihiin.

Ku taariikheysan: _______________ Saxiixa: ___________________________________
Magaca: ___________________________________
"Nambarka": ___________________________________
Ciwaanka: ___________________________________
___________________________________